

**Xeerka 18 Janaayo 1957, lamba. 6 rep.**

**Wakaaladda la siiyay Wasiir Ku-xigeenka Guddoonka Golaha Wasiirada.**

## **MAAMULAH**

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 ee ku saabsan Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya;

Marka uu arkay Dekeretda 18 Maajo 1956, lamba. 78: ee ku saabsan Xeer Hoosaadka Xukuumadda Soomaaliya;

Marka uu arkay dekeretada 31 Oktoobar 1956 lamba. 106 ee ku saabsan Abuuridda Wasiir Ku-xigeenka Guddoonka Golaha Wasiirada;

Marka uu arkay Dekeretda 31 Oktoobar 1956, lamba. 73 ee ku saabsan Magacaabidda Wasiir Ku-xigeenka Guddoonka Golaha Wasiirada;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo awoodaha qaarkood oo ku saabsan oggolaashaha saxiixa kharashaadka arrimo cayiman in loo wakiisho;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;  
Soo jeedinta Wasiirkha Koobaad;

## **WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAY**

### **Qodobka keliya**

Wasiir ku-xigeenka Guddoonka Golaha Wasiirada Maxamud Axmed Maxamed Aadan, waxaa loo wakiishay:

- a) in uu qaado xilka saaran miisaaniyadda Soomaaliya ee ku saabsan cutubyada maamulka Guddoonka Golaha Wasiirada, marka laga reebo cutubka kharashka la gaar yeelay;
  - b) in uu saxiixo amarada bixinta lacagaha iyo dekereetooyinka ka saaridda maamulka wixii ku siman xudduuda qoondaynta raasmaalka la maamulayo iyado loo hoggaansamayo shuruueda arrimahaas ka jira;
  - c) in uu saxiixa dhammaan qoraalada iyo qaraarada xitaa kuwa laga sameeyay Guddoonka Golaha Wasiirada, marka laga reebo kuwa khuseeya qorista shaqaalaha; saxiixo sidoo kale waraaqaha caadiga ee ku saabsan hawl socdsiinta caadiga ee Guddoonka isaga.
- Muqdisho 10 Jannaayo 1957.

P. Maamulaha  
**P. Franca**

### **Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Lagu Sugat lamba. 2, 12 Jannayo 1957

Madaxa Xisaabadka: **Tura**

La Hubiyay lana diiwaangeliyay – Diw. lamba. 1 bogga lamba. 2

Muqdisho, 10 Janaayo 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**